

Warbixin ka soo Horjeeda Gudniinta Dumarka

2016

Gudniinta Dumarka (Female Genital Mutilation (FGM)) waa dhibaataayn ilmo waa fal aad u xanuujinaya oo wata saamayno caafimaad ku imaanaya gabdhaha iyo dumarka. Qaar gabdhaha ah waxay u dhintaan dhiig bax ama cudur ka dhasha ee si toos ah maxsuulka nidaamkan uga yimaada. Qaar dumarka ah ee lagu sameeyay FGM waxay u badan tahay inay ku adkaato ilmo-dhaliddu iyadoo qaar badana ay la il-darnaadaan dhibaato maskixiyan muddo dheer.

Maxaa loogu talo-galay warbixintan:

Waa inaad warbixintan sii qaadataa markii aad dibadda aadayso. Waxaad tusi kartaa qoyskaaga. Tani waxay caddaynaysaa in FGM tahay **fal-dambiyeed aad u daran** ee waddanka UK taasoo leh ciqaab ganaax gaaraya ilaa 14 sano xabsi ah ee qof kasta oo lagu helo dambiga. Waalidkaaga, ama cid-kasta oo ku daryeelaya, waxay noqon karaan dambiile haddii ay ku guul-

daraystaan inay kaa dhawraan in FGM lagugu sameeyo.

Xafido warbixintan: Waa inaad wadataa waqti kasta – gaar ahaan markii aad aadayso dibadda.

Waa maxay FGM: FGM waa tolidda dusha xubinta taranka dumarka iyadoo aan lahayn wax sababo caafimaad ah. Waxaa mararka qaar loo yaqaan gudniinka dumarka ama 'sunna'.

Sharciga UK: FGM waa dambi waddanka UK¹.

- **Xitaa haddii qofka loo qaado dibadda laguna sameeyo FGM, weli waa dambi waddanka UK haddii tolliinka lagu sameeyay qof muwaadiin UK ah ama deggan UK.**
- Sidoo kale waa dambi in qof muwaadin UK ah ama degan UK uu caawiyo ama falka uu u sameeyo qof aan muwaadin UK ahayn ama deganayn oo FGM dibadda lagu sameeyo muwaadin UK ah ama degan

¹ England, Wales iyo Northern Ireland, Falku waa sharci-darro iyadoo la eegayo Xeerka Gudniinka Dumarka - Female Genital Mutilation Act 2003. Scotland waa sharci-darro iyadoo la eegayo Xeerka Mamnuucidda Gudniinka Dumarka - Prohibition of Female Genital Mutilation (Scotland) Act 2005.

- Iyadoo haddii FGM lagu sameeyo gabar ka yar da'da 16, qof kasta oo mas'uul ka ah gabadha waqtiga ay qusayso uu dambiile yahay fal-dambiyeed².

Ciqaabaha Dambiyeed: Qof kasta oo dambiile u noqda fal-dambiyeedka FGM – ama caawiya qof sameeyay – wuxuu wajahayaa 14 sano oo xabsi ah, ganaax, ama labadaba.

Qof kasta oo noqda dambiile inuu ku guul-daraystay ka dhawrida gabar khatarta FGM wuxuu wajahayaa ilaa 7 sano oo xabsi ah, ganaax, ama labadaba.

² England, Wales iyo Northern Ireland.

Caawin iyo taageero: Haddii aad ka walwalsan tahay inay tani ku dhacdo adiga ama qof aad garanayso, waxaad kala hadli kartaa si xog-xajin leh macallin, dhakhtar, kalkaaliye dugsi, hawl-wadeen bulsho, sarkaal booliis ama xirfadle kasta ee caafimaad, waxbarasho ama daryeel bulsho. Waxay awoodaan inay ku caawiyaan, taageeraan ayna ku difaacaan. Haddii aad tahay dhibbane FGM oo aad u gudbiso booliiska, waxaa lagu siinayaa qarsoonaan abadiyan ah laga bilaabo waqtiga sheegidda la sameeyo. Tani macnaheedu waa inaan wax macluumaad ah la daabici doonin kaasoo ku aqoonsan kara inaad dhibbane FGM tahay, xitaa haddii uusan jirin kiis maxkamadeed.

Haddii aad UK joogto oo aad ka walaacsan tahay in dibadda laguugu qaado sababo la xiriira FGM fadlan **wac booliiska adigoo garaacaya 999.**

Haddii aad ku sugan tahay dibadda aadna caawinaad ama talo u baahan tahay fadlan wac **Xafiiska Arrimaha Dibadda iyo Barwaaqasooranka ee +44 (0) 20 7008 1500**

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa caawintaad iyo taageero:

Khadka-caawinta NSPCC FGM:
0800 028 3550
limayl: fgmhelp@nspcc.org.uk

Khadka-carruurta

Teleefoon: 0800 1111

www.childline.org

Equality Now

(ee Nairobi, Kenya iyo London, UK)

Tel (London): +44(0) 20-7304 6902

Tel (Nairobi): + 254 20-271-9832

www.equalitynow.org

© Xuquuqda daabacaadda
Maxkamadda 2016

